

Xeerka 12 Nofember 1957, lamba. 38, rep.

Abuuridda Wasiir Ku-xigeen ka tirsan Guddoonka Golaha Wasiirada

MAAMULAHA

Isagoo tixgalinaya awoodda uu siinayo Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1;
Marka uu arkay Dekreetada 18 Maajo 1956, lamba. 78: “Xeerka Nidaamka Xukuumadda Soomaaliya”;

Marka uu arkay dekreetada 31 Octoobar 1956, lamba. 106: “Abuuridda Wasiir Ku-xigeen ka tirsan Xaafiiska Wasiirka Kowaad;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in loo abuuro Wasiir Ku-xigeen Guddoonka Golaha Wasiirada;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

Tala soo jeedinta Wasiirka Koowaad;

WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA:

Qod. 1

Waxaa loo abuuray Wasiir Ku-xigeen labaad Guddoonka Golaha Wasiirada.

Qod. 2

Wasiir Ku-xigeenka cusub wuxuu la qaybsanayaa Wasiirka Koowaad hagidda Xaafiiska Guddoonka isgoo qabanaya hawlaha loo igmaday.

Muqdisho, 12 Nofember 1957.

Anzilotti

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Waa la hubiyay lana Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 5 – bogga 21

Muqdisho, 12 Nofember 1957.